



Xusuusin Ku Saabsan Sahanka Dib U Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta ah ee Iskuulada 2020 Lana Qaban Doona Maalinta Khamiista Shir Qaab Muuqaal Fiidiyow ah

Bulshada Qaaliga ee PPS,

Waxaan rabnaa in aan idin xasuusino fursado ku saabsan sidii aad jawaabcelin uga bixin lahaydeen Dib u Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta ah Iskuulada 2020, waxaana ka mid ah mida hadda bulshada loo furay. Sahanka Dib u Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta Iskuulada iminka dadweynaha waa u furan tahay. Sahankuna wuxuu idiin ogolaan doonaa in aad ray'igiina ku kordhisaan naad u aragtaa waxyaabaha aad mudnaanta siineysaan iyo qaababka loo maalgalinayo, sahankaasi wuxuu furnaan doontaa ilaa 5:00 p.m., maalinta Jimcaha , bisha Luulyo 3-deeda:

- [Guji halkani](#) si aad sahanka u qaadato

Waxaan sidoo kale rabnaa in aan idin xasuusino shir u dhacaya qaab muuqaal fiidiyow ah oo ku saabsan Dib u Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta Iskuulada 2020 saacadu marka ay tahay 6:00 p.m. Maalinta Khamiista, ee bisha tahay Juun 25 keeda. Xanuunka Coronavirus dartiis, waxa aanu shirka waxaa loo qabaneynaa qaab online kaliya, laakiin mustaqbalka waxa loo soo bandhigi doonaa kulanada oo la kala qeybiyey iyo qolol muuqaal fiidiyow laga soo muuqanayo. Si aad uga qeybqaadatan, [fadlan jawaabtada ayaan u baahanay \(RSVP\)](#).

Haddii aad rabto in aad daawato kulanka, waxaa laga siidayn doonaa degalka PPS si toos ah ([PPS live-stream site](#)).

Waxa aad sidoo kale jawaabcelin noogu soo diri kartaa si toosa ah halkan schoolbond@pps.net.

Dib u Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta ah ee 2020 waxa lagu maalgalin doonaa mashaariic taaageera kala duwanaanshaha iyo ardayda qabta baahiyaha gaarka ah; caafimaadka degdega ah, nabadgelyada, iyo horumarinta waxbarashada oo ay ka mid yihiin cusbooneysiinta teknoolajiga loo adeegsado waxbarashada ka fog fasalada iskuulada ee guryaha lagu qaato iyo waliba sii wadista sidii loo cusbooneysiin lahaa si dhammeystiran dhismayaasha saddexdii dugsi sarre ee hadhay ee kala ah: Cleveland, Jefferson iyo Wilson. Haddii la ansixiyo, waxa ay noqon doonto heerka qiimaha cashuurta hadda, iyada oo ay jiri doonto dhowr doorasho oo Golaha Waxbarashada ay tahay inay go'aamiyaan.

Wixii faahfaahin ah ee ku saabsan doorashooyinka la kala dooranayo, wixii dekumentiyada kale iyo asalka waxa la kala dooranayo oo ay la socdaan wargalin joogta ah wixii cusub ee soo kordha fursadaha lagaga qeybqaadanayo, fadlan waxaad tagtaa halkan pps.net/2020bondrenewal.

Waad mahadsan tihiiin.